SOMALI

NHS
Greater Glasgow and Clyde

# TB

# Hagaha Daaweynta Qaxada (TB)

**(Af-Soomaali)**

Wixii talo ah, la xiriir:

## Qaaxada (TB)

Qaaxada (TB) waa bakteeriyo (jeermis) saameyn karta qayb kasta oo jirka ka mid ah, laakiin inta badan waxay saameysaa sambabada.

Qaaxada si buuxda ayaa loo daweyn karaa haddii aad qaadato kiniinnada antibiyootigga ee saxda ah muddada saxda ah.

Jooji qaadashada kiniinnada oo keliya marka dhakhtarkaaga ama kalkaalisada qaaxadu kuu sheegto.

## Daawooyinka Qaaxada

Waxaad u baahan doontaa inaad daawooyinka qaadato ugu yaraan 6 bilood, mararka qaarkoodna muddo ka dheer.

Qaaxada marka hore waxaa lagu daaweeyaa 3 ama 4 nooc oo kala duwan oo kiniinno antibiyootig ah, kuwaas oo markaas loo yareeyo 2 ama 3 nooc inta ka harsan muddada daaweynta.

# Sida loo qaato daawooyinka Qaaxada

- Waa inaad kiniinnada qaadataa maalin kasta (30 daqiiqo ka hor quraacda).
- Dhammaan kiniinnada hal mar wada qaado subaxdii.
- Ha ka boodin kaniinada. (Haddii aad subaxdii illowdo kiniinnada, qaado goor dambe oo isla maalintaas ah).
- Ha u oggolaan kiniinnadu inay kaa dhammaadaan; hel sahay cusub ka hor inta aysan kuwii hore dhammaan.

# Ka fogow

Waa inaadan isticmaalin sariiraha qorraxda inta lagu jiro daaweynta Qaaxada. Fadlan isticmaal kareem qorrax-celin leh oo heer ilaalin sare leh marka maqaarkaagu uu la kulmayo qorrax xooggan. (Qaar ka mid ah kiniinnada daaweynta Qaaxada waxay maqaarkaaga ka dhigi karaan mid aad ugu nugul fallaadhaha qorraxda).

# Dhibaatooyinka ka dhalan kara

- Waxaa laga yaabaa inaad aragto in kaadida, dhididka iyo ilmadu ay isu beddelaan midab casaan ama oranji ah. Tani waa saameyn aan waxyeello lahayn. (Muraayadaha indhaha lagu dhejiyo ee jilicsan ayaa midabkoodu is beddeli karaa).

- Kiniinnada daaweynta Qaaxada waxay yareyn karaan waxtarka ‘kiniinka’ ka hortagga uurka ee afka laga qaato iyo hababka kale ee ka hortagga uurka. Tani waxay ka dhigan tahay inaad sidoo kale u baahan doonto inaad isticmaasho hab xannibaad lagu kalsoonaan karo sida kondhom. Fadlan kala hadal dhakhtarkaaga ama farmashiistahaaga talo ku saabsan hab kale oo ka hortagga uurka ah.
- Dhakhtarkaagu wuxuu u baahan karaa inuu wax ka beddelo qiyaasta daawooyinka kale inta aad qaadaneyso kiniinnada daaweynta Qaaxada. (Warfarin, daawooyinka ka hortagga suuxdinta, steroids-ka iyo methadone waa tusaalooyin, laakiin dhakhtarkaaga ayaa qiyaasahooda wax ka beddeli doona haddii loo baahdo).

Haddii ay kugu adkaato qaadashada daawooyinka Qaaxada, ha joojin qaadashadooda hana ka boodin qiyaasaha. La xiriir dhakhtarkaaga ama kalkaalisada Qaaxada si aad caawimaad u hesho.

**Haddii aad isku aragto mid ka mid ah dhibaatooyinka hoos ku qoran, isla markiiba la xiriir kalkaalisada Qaaxada ama dhakhtarkaaga si aad talo u hesho:**

- Matag
- Qandho
- Aragga oo khalkhala
- Finan ama cuncun sii socda
- Faraha gacmaha ama lugaha oo ku mudmuda ama kabuubya

## Ha joojin qaadashada daawadaada xilli hore

### Ha ku degdegin inaad daawada joojiso xilli hore sababtoo ah waxaad bilowday inaad fiicnaato.

Haddii aad daawada xilli hore joojiso, bakteeriyadu way sii kori doontaa waxayna noqon doontaa **mid aad u adag** in la daaweeyo.

Waxaad u baahan kartaa kiniinno badan **muddo ka dheer**, maadaama bakteeriyadu **ay iska caabin u yeelan karto** daaweynta antibiyootigga.

Tani waxay ka dhigan tahay in antibiyootiggu uusan mar dambe dili karin bakteeriyada ku jirta jirkaaga.

Waxaad sidoo kale **geli kartaa khatar ah inaad faafiso bakteeriyada Qaaxada** oo aad u gudbiso **qoyskaaga**, saaxiibbadaada ama dadka kale ee aad waqti la qaadato.

## Daawooyinka Qaaxada ee la isticmaalo:

**Ama mararka qaarkood 2-3 nooc oo antibiyootig ah ayaa lagu daraa hal kiniin**

| | |
|---|---|
| **Voractiv** | |
| **Rifater** | |
| **Rifinah** | |
| **Ethambutol** | |

**Daawooyinka Qaaxada sidoo kale waxaa loo qori karaa sida soo socota:**

| | |
|---|---|
| **Rifampicin** | |
| **Isoniazid** | |
| **Pyrazinamide** | |
| **Pyridoxine (vitamin B6)** | |

## XUSUUSNOW:

- Qaaxada waxaa lagu daweyn karaa daaweynta saxda ah
- Waa inaad kiniinnada antibiyootigga u qaadataa maalin kasta sida laguu qoray
- Ha joojin qaadashada kiniinnada antibiyootigga ilaa dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaadu kuu sheegaan
- Isku day inaad tagto dhammaan ballamaha rugta caafimaadka